



Warbixinta waxqabadka Ardayga ee Qarsoodiga ah

Tallaabooyinka Colorado ee Guusha Waxbarashada

Ardayga: **E214G6PVFIRSTNAME B. ASTNAME4**

SASID: **2019060115**

Taariiqdadhalaashada: **03/01/2004**

Dugsiga: **DUGSIGA HOOSE EE ALTURA (0214)**

Degmada: **VALLEY RE-1 (0180)**


Gu'ga 2019

Xisaabta

Fasalka 6

Warbixintan buundadu waxay bixinaysaa macluumaad kusaabsan waxqabadka ardaygaaga ee Tallaabooyinka Colorado ee Guusha Tacliineed (CMAS) ee imtixaanka Xisaabta.

- waxqabadka Ardaygaaga waxa u taagan miisaan buundo, heer hawlqabad, iyo darajada boqolkiiba. Buundooyinka waxa la saaraa miisaan si hawlqabadyada ardayda la isku barbardhigi karo sanado badan.
- Garaafka, miisaanka buundooyinka waxa u taagan dhaaymoonada. Fallaadhaha ku meersan dhaaymoonta ardaygaagu waxay muujinayaan cabbirka buundooyinka ardaygaagu laga yaabo inuu helo haddii imtixaanka la qaaday marar badan.
- Macluumaadka dugsiga, degmada, iyo gobolka ayaa la bixiyaa si markaas aad isku barbardhigi karto sida waxqabadka ilmahaaga marka loo eego waxqabadka kuwa kale. Boqolleyda ardayda heer waxqabad oo kasta gobolka oo dhan waxa lagu sheegaa garafaka hoostiisa.
- Xariiqaha dhibcaha ah waxay muujinayaan halka cabbirka buundooyinka loo qaybiyey heerka waxqabadka.
- Waxa lagugu dhiirigelinayaa inaad kala hadasho warbixintan macallinka ardaygaaga



Sharaxaha Heerka waxqabadka* - Buuxiyey Filashooyinka

Ardayda **Buuxisay Filashooyinka** waxay ku taagan yihiin dhabbaha heerka fasalka xiga waxayna caadi ahaan muujiyeen waxa soo socda:

Casharada Muhiimka, Dheeraadka & Taageerada ah

- Isticmaalka sababayn si uu u xalliyo masalooyin xisaabeed oo wax jira kusaabsan kuwaasi oo ku lug leh saami, sicirka halbeeg, boqolley, iyo baddalista halbeegga isagoo isticmaalaya jaantusyo iyo xeelado tiro kooban.
- Xalliyo masalooyin hal tallaabo ah isagoo u qaybinaya lambarro godad badan oo kaga shaqaynaya dhammaan aftarta xisaab-fallo tobanlayaal godad badan. U qaybinaya jajabyada hoosayaal kala duwan marka uu xallinayo masalooyinka la fududeeyey. Isticmaalka astaanta qaybineed si uu dib ugu qoro wadarta laba tiro oo idil isagoo isticmaalaya isir-waynaha ay wadaagaan. Fahmo in tirooyinka togan iyo kuwa taban la isbarbardhigi karo iyada oo aan la isticmaalayn xariiqda tirada. Fahmo qiime sagan. Sawiro lammaanaha horsan si uu u xalliyo masalooyin xisaabeed oo wax jira kusaabsan. Raadiyo isir-waynaha ay wadaagaan iyo dhufsana-yaraha ay wadaagaan. Isticmaalo astaanta qaybineed si uu dib ugu qoro wadarta laba tiro oo idil.
- Qiimeeyo tibaaxaha tireed iyo aljabreed. Garto tibaaxaha isku dhigma isagoo isticmaalaya astaamaha xisaab-fallada. Qoro tibaaxo aljabreed oo leh jibbaaro tiro idil ah, Qoro isleeg hal tallaabo ah si uu u xalliyo masalooyin xisaabeed oo wax jira kusaabsan. Qoro oo garaaf ku sawiro kala duwanaanshaha si ay ugu taagnaadaan caqabad ama xaalad wax jira kusaabsan ama xisaabeed.
- Xalliyo masalooyin wax jira kusaabsan oo ku lug leh bedka geesoolayaal isagoo isticmaalaya xeelado badan. Go'aamiyo shabagyada sawirro 3-D ah (saddex dhinac laga cabbiro) si uu u soosaaro bedka oogada.
- Ku muujiyo xog sawirro sanduuq ah oo soo koobo xaaladda jirta isagoo isticmaalaya celceliska xogtu heerka ay ka duwan tahay oo ah cabbir sheegaya kala duwanaanshaha xogta dhexdeeda.

Muujinta Sababayn Xisaabeed

- Gudbiyo sababaynta iyada oo ayna jirin qaladaad xisaabeed. Fasiro oo dhaliilo sababaynta ardayda kale. Isticmaalo saxsanaan sarraysa xiriirka fasal ahaan habboon.

Qaabaynta & Adeegsiga

- Isticmaalo qiyaaso si uu ugu dabbaqo xisaabta xaaladaha wax jira kusaabsan. Naqdiyo xiriirada ka dhexeeya qiimayaasha si uu gunaanad u gaadho. Abuuro mooddo isagoo dooranaya qalabka habboon, kadibna hagaajinaya mooddada oo kusalaysan natijoooyin.

Sharaxayaasha heerka waxqabadka (PLDs) waxa loo abaabulaa qaab ka soo qaada in ardaydu ay muujiyaan inay si aad u heer sarraysa ay u fahmaan nuxurrada iyo xirfadaha heerarka hoose gudaha. Si aad u aragto qaybta dhammaystiran ee PLDs-ka, booqo:

http://www.cde.state.co.us/assessment/grade_4_english_language_arts_plds.

*Laga soo xigtay Guudmarrada Heerka waxqabadka ee ilClassroom in Action

Ujeedada

Warbixintan waxay sharaxaysaa sida ardaygaagu ku yahay Heerarka Tacliineed ee Colorado ee Xisaabta.


Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan barnaamijka qiimaynta CMAS, booqo <http://www.cde.state.co.us/assessment/cmas>

Xisaabta

Qarsoodi

Waxqabad Hoosaadyada

- Boqolkiiba dhibcaha ardayga helo qaybo-hoosaadyada mid kasta oo kamid ah afarta qiimaynaha xisaabta waxa u taagan mid kasta oo kamid ah jaantusyada hoose.
- Celcelisyada degmada iyo gobolka ayaa loo bixiyaa isbarbardhig dartood.
- Xariiqda taagan ee madaw waxay muujinaysaa celceliska boqolkiiba dhibcaha ay heleen ardayda gudbay heerka waxqabadka Buuxiyey Filashooyinka ee guud ahaan imtixaanka xisaabta.



Xisaabta	Dhibcaha Suurtogalka ah	0%	Boqolkiiba Dhibcaha la Helo*			
			25%	50%	75%	100%
Casharka Muhiimka ah Ardaydu waxay xalliyaan masalooyin ku lug leh saamiyada, sicirrada, boqolleyda, iyo fahmida tirooyinka taban, garaaf ku sawirista baro iyo fansaarka toosan ee sahlan, tibaaxaha toosan, iyo isleegyada toosan.	20	75%				
Casharada Dheeraadka & Taageerada ah Ardaydu waxay xalliyaan masalooyin ku lug leh bedka, mugga, iyo istaatiigiska.	9	0%				
Muujinta Sababayn Xisaabeed Ardaydu waxay abuuraan oo u qiil sameeyaan xalal xisaabeed oo macquul ah oo naqdiyaan oo saxaan sababaynta kuwa kale.	11	91%				
Qaabaynta & Adeegsiga Ardaydu waxay xalliyaan masalooyin wax jira kusaabsan, waxay halkooda galiyaan oo ku xalliyaan masalooyin calaamado, u sababeeyaan si tiro ah (caddad), oo si xeeladaysan u isticmaalaan qalabka ku habboon.	11	45%				

*Boqolkiiba dhibcaha la helo la isma barbardhigi karo sanado badan sababtoo ah shayadu waa isbaddalaan sanadka ka dambeeya. Sidoo kale la isma barbardhigi karo qaybo-hoosaadyada sababtoo ah tirada shayada iyo adkaanta shayadu waxa dhici karta inayna sidooda sii ahaan.

